F:40

Ku: SHIRGUDOONKA GOLAHA WAKIILADA JSL HARGEYSA

OG: MUDANAYASHA GOLAHA WAKIILADA JSL HARGIESA

UJEEDO: SOO JEEDIN

Annaga oo kala ah mudanayaasha ay magacyadoodu hoos ku qorran yihiin;

Ana goo tixraacayna distoorka JSL, qoddobada kala ah,.45aad, 49aad, 50aad iyo 53aad;

Annaga oo cuskanaynna xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada qod. 37aad. Faq.1 iyo 2aad oo muujinaya in mudanayaashu xaq ay u leeyihiin inay Golaha soo hordhigaan Soo-jeeddimo (motions) haddii tiradoodu ay dhan tahay kow iyo toban(11) isla markaana ay soo-jeedintu qoraal tahay

Anna goo ogsoon in Golaha Wkiilladu uu ka baaqday gudashada in ka badan waajibaadkiisa iyo xilalkiisii distooriga ahaa iyo waxqabadkii uu ka sugayey dadweynuhu;

Annaga oo aqoonsan in xeer-hoosaadku yahay furaha ama qalabka sharciyeed ugu muhiimsan xilgudashada iyo fulinta hawlhiisa;

Annaga oo garowsan in Xeer-hoosaadka Golaha wakiillada oo ansixiyey shan sano ka hor, si qarbaqarba ah;

Annaga oo ogsoon in muddadii uu Goluhu furnaa aan wax isbeddel ah lagu samayn, iyada oo loo baahnaa in waayo-aragnimoda iyo khibraddii Golaha lagu buuxiyo xeer-hoosaadka'

Annaga oo ogsoon in mugdi iyo muran badani ka dhashay xeer-hoosaadkan muddadii uu Golahani furnaa, taasina ay carqalad ku noqotay xilgudashadii Golaha

Ka dib markii ay soo baxeen goldaloolooyin fara badan oo xeer-hoosaadku ka muuqday,oo u baahan in la daboolo;

26.3.2012

Annaga aqoonsan in qodobbo ka mid ah xeer-hoosaadku ay k soo horjeedaan distoorka iyo mabaaddiida asaasiga ah ee dimuqraaddiyadda;

Annga oo ka niyad-xun hab-dhaqanka oo hoos u dhigay magacii iyo karaamadii Golaha, iyada oo ay gaadhey in mudanayaasha laga baahiyo warbaahinta, ka dib markii ay ka soo xadiri waayeen fadhiga Golaha,

Anaga oo ogsooon inay fadhiyada goluhu marar badan u furmi-waayeen kooram la'aan, iyadoo ay mudanayaal badani caasimadda ku sugan yihiin.

Annaga oo ogsoon in ay jiraan xil-dhibaanno golaha ka maqan muddo dheer oo gaadhaysa sannado ,iyaga oo aan laga qaadin wax-tallaabo ah; golahana aan la ogaysiin sababaha ay ku maqan yihiin;

Anaga oo ogsoon inay marar badan fadhiyada goluhu u baaqdaan ama u furmaan si sharci darro ah oo aan waafaqsanayn distoorka iyo xeer-hoosaadka golaha, taas oo mararka qaarkood fadhiyada golaha lagu baajiyo fariin telefoonnada loo mariyo, halka uu sharcigu dhigayo in dib u dhigidda fadhiyada lagu meelmariyo go'aan gole.

Annga oo kà duuleynna mabaadiida dimuqraaddiyadda ee asaasiga ah sidaa wada-xisaabtanka iyo daahfurnaanta (transparency and accountability)

Waxannu Golaha u soo jeedinaynaa:

a) In waxa laga beddelo qodobbada xeer-hoosaadka ee soo socda.

1. Qod. 12.faq.2aad. oo u qoran sidan:

MUsharaxiinta u tartamaya gudoomiyaha iyo kuxigeennada golaha cusub , jago-kasta waa inaanay ka badnayn saddex xubnood oo ku yimaadda soo jeedinta mudanayaasha saddexda xisbi qaran oo si dimoqraadi ah uga soo tartamaya xisbiyada dhexdooda),

Waxaanu soo jeedinaynaa in loo bedelo siddan:

(Musharaxiinta u tartamaya jagada banaan ee shirgudoonka waxay mudanayaashu si dimoqraadi ah ugu tartamayaan golaha dhexdiisa, jago-kastana waxa u tartami kara hal-mudane iyo inka badan.

2- Qoddobka 16aad, faqradda 1aad oo u qorran:

Waxa xubinkasta oo shir-gudoonka ka mid ah xilka lagaga qaadi kraa marka ay soo jeediyaan toddoba iyo labaatan xubnood (27), shan iyo konton xubnood-na (55) u codeeyaan xil-ka qaadistooda, marka laga reebo xubnaha banaanaan-shahooda la baahiyey waxa shirgudoonka waajib ku ah marka mudanayaasha tiradoodu kor ku xusan tahay ay qoraal ugu keenaan soo jeedintooda inay codayn u muddeeyaan, iyaga oo u qabanaya muddo aan ka badnayn saddex maalmood oo shaqo, kana yarayn 24 saacadood),

waxaanu soo jeedinaynaa in loo bedelo siddan:

A: Xil-ka qaadista shirgudoonka waxa soo jeedin kara 27 mudane.

B: Shir-gudoonku waxa ku waajib ah marka ay mudanayaasha tiradoodu kor ku xusan tahay ay qoraal ugu keenaan soo jeedintooda inay codayn u muddeeyaan, taas oo ah ugu badnaan 3 maalmood, isla markaana aan ka yarayn 24 saacadood.

C: Xil-ka qaadista xubnaha shirgudoonku waxay ku ansaxaysaa marka ay u coddeeyaan ugu yaraan 42 mudane (Absulute majority).

3- Isla qoddobka 16aad, faqradiisa 4aad oo u qorran: (Xil-gudasho la'aan joogta ah).,

waxaanu soo jeedinaynaa in loo bedelo siddan:

Xil-gudasho la'aan joogta ah, taas oo ku imanaysa ka maqnaansh golaha labaatan fadhi oo isku xiga idin la'aan).

Waxa kale oo aanu soo jeedinaynaa in faqradaha B, T iyo J, ay kala noqdaan, 5, 6, iyo 7).

4- Waxaanu soo jeedinaynaa in meesha laga saaro Qoddobka 17aad, faqadiisa 1aad.

5- Waxa kale oo aanu soo jeedinaynaa in qoddobka 33aad, faqradiisa 6aad oo u qorran siddan: (Shirgudoonku ma fasaxi karo 15 xubnood wax ka badan kal-fadhi kasta hadii aan duruufi qasbin),

Waxaanu soo jeedinaynaa In loo bedelo:

(A: Shirgudoonku wuxuu kal-fadhi kasta fasaxi karaa ugu badnaan 15 xubnood, wixii intaa ka badan golaha ayaa ogolaansho loo waydiinayaa).

B: Fasaxa ugu badan ee uu shirgudoonku bixin karaa waa hal-kalfadhi (8 toddobaad), wixii intaa ka badan golaha ayaa ogolaansho loo waydiinayaa.

6- Qoddobka 37aad, faqradiisa 6aad, oo u qorran siddan:

Shirgudoonku wuxuu soo hordhigayaa soo jeedinta golaha, hadii aanay soo jeedintu ka hor-imanayn distoorka, shuruucda dalka ama xeer-hoosaadka golaha, ka dibna wuxuu ogolaanayaa in laga doodo),

waxaanu soo jeedinaynaa in loo bedelo siddan:

Waxa waajib ah in Shirgudoonku soo jeedinta soo hor-dhigo golaha, go'aan ka gaadhista soo jeedinta waxa iska leh golaha, in laga doodo iyo inaan laga doodin.

Isla qoddobka 37aad, faqradiisa 6aad, oo siddan u qorran

hadii ay muuqato inaanay soo jeedintu waafaqsanayn distoorka, ama shuruucda dalka ama xeer-hoosaadka golaha loo qaybin-maayo golaha, lagana doodi-maayo) waxaanu soo jeedinaynaa in meesha laga saaro.

Waxaa kaloo aanu soo jeedinaynaa

b) In lagu daro xeer-hoosaadka qodobbada soo socda.

1- Qoddobka 13aad, waxaanu soo jeedinaynaa in lagu kordhiyo faqradda soo socota oo noqonaysa faqradda 1aad, una qorran siddan: (Awoodda ugu saraysa ee golaha wakiiladu waa fadhiga gole-weynaha (Assembly).

2- Fadhiga gole-weynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu wax ka bedelo ama laalo qoddob ama qoddobo ka mid ah xeer-hoosaadka kalfadhi kasta oo loo baahdo.

Alla Mahad leh.